W/Q: Maxamed Axmed Maxamed (Saqaafa)

Garoowe iyo Caqabadaha Dhaqaale-Bulsho: Maxaa Nolosha Dadka Magaalada ku Adkeeyay?

Falanqayn ku saabsan hoos u dhaca dhaqaalaha, shaqo la'aanta, yaraanshaha ilaha dakhliga iyo saamaynta colaadaha amni ee nolosha bulshada Garoowe.

Garoowe, oo ah magaala madaxda Puntland, waxay muddo dheer ahayd magaalo ay ku tiirsanaayeen dhaqdhaqaaqa ganacsiga, shaqooyinka dowladda, hay'adaha caalamiga ah, mashaariicda horumarineed iyo lacagaha ay qurba-joogtu u soo diraan ehelkooda. Waxay sidoo kale hoy u ahayd dad badan oo ka yimid gobollada kale, kuwaas oo u soo guuray raadinta waxbarasho, shaqo, adeegyo caafimaad iyo fursado dhaqaale. Hase yeeshee, sannadihii dambe waxaa soo kordhay duruufo dhaqaale oo si weyn u saameeyay awoodda nololeed ee qoysaska magaalada. Nolosha Garoowe waxay wajahaysaa cadaadis ka dhashay ilo dhaqaale oo sii yaraanaya, shaqooyin lumay, awoodda wax-iibsiga oo hoos u dhacday iyo hubanti la'aan mustaqbalka ah. Caqabadahani ma aha kuwo hal sabab ka dhashay, balse waa arrimo isbiirsaday oo saameyntoodu si toos ah uga muuqato nolosha dadka caadiga ah.

1. Hoos u dhaca ama guuritaanka hay'adihii caalamiga ahaa

Mid ka mid ah arrimaha sida weyn u saameeyay dhaqaalaha Garoowe waa hoos u dhaca mashaariicdii iyo shaqooyinkii ay abuuri jireen hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee taageerada ka hela deeq-bixiyeyaasha. Muddo dheer, hay'adahani waxay qayb muhiim ah ka ahaayeen dhaqaalaha magaalada. Waxay shaqaaleysiin jireen dhalinyaro, aqoonyahanno, khubaro iyo shaqaale xirfado kala duwan leh. Sidoo kale, waxay dhaqaale geli jireen hoteellada, guryaha la kireeyo, gaadiidka, maqaayadaha, dukaamada iyo adeegyada kale. Markii mashaariicdii qaarkood la hakiyay, miisaaniyadihii la dhimay ama shaqaalihii la fasaxay, saameyntu kuma ekaan dadka hay'adaha ka shaqaynayay oo keliya. Waxaa hoos u dhacay dhaqaalihii ay ka heli jireen ganacsatada iyo qoysaska ku tiirsanaa shaqaalahaas. Warbixin la daabacay Maarso 2025 ayaa sheegtay in in ka badan 500 oo shaqaale gargaar ah oo Puntland ka hawlgeli jiray shaqooyinkoodii waayeen, halka xafiisyo qaar ay qorsheynayeen xiritaan ama dhimista shaqaalaha.

2. Mushahaar la'aanta shaqaalaha dowladda

Shaqaalaha dowladda ayaa iyaguna wajahaya dhibaato dhaqaale oo saameyn ku yeelatay noloshooda iyo tan qoysaskooda. Mushaharku ma aha oo keliya lacag uu shaqaaluhu qaato, balse waa dhaqaale wareega oo taageera ganacsiga iyo adeegyada magaalada. Marka shaqaalaha dowladda muddo dheer mushahar waayaan ama dib looga dhigo, waxaa adkaada bixinta kirada guryaha, kharashaadka waxbarashada carruurta, caafimaadka, cuntada iyo deymaha. Dhibaatadani waxay leedahay saameyn dhaqaale oo silsiladaysan: shaqaalihii wax

iibsan jiray ayaa awooddoodii wax-iibsiga luminaya, ganacsatadii wax ka iibin jirtayna waxay la kulmayaan macaamiil awooddoodii dhaqaale hoos u dhacday.

Warbixino la xiriira Puntland ayaa soo bandhigay dib-u-dhacyo mushahar oo soo noqnoqday, gaar ahaan 2023 iyo 2025 ayuu Garoowe Online ka sameeyay ee hoos ka eeg.

3. Hoos u dhaca lacagaha qurba-joogta

Lacagaha qurba-joogtu u soo diraan qoysaskooda waxay muddo dheer ahaayeen laf-dhabarta nolosha qoysas badan oo Garoowe ku nool iyo guud ahaan dalkaba. Lacagahaasi waxay dabooli jireen kirada guryaha, cuntada, waxbarashada, caafimaadka iyo kharashaadka maalinlaha ah. Qoysas badan ayaa noloshooda ku maareyn jiray taageerada joogtada ah ee ehelkooda dibadda ku nool. Hase yeeshee, waxaa jira qoysas dareemaya in taageeradii ay heli jireen ay yaraatay ama aanay sidii hore u joogto ahayn laga soo bilaabo 2020 oo ahaa xilligii uu arlada aafeeyay Karoonuhu . Waxaa arrintan qayb ka ah culayska dhaqaale ee haysta qurba-joogta, kororka kharashaadka nolosha dalalka ay joogaan iyo tirada qoysaska ay taageeraan. Waa muhiim in la kala saaro xaaladda qoysaska Garoowe iyo tirakoobka guud ee dalka: xogta Bangiga Adduunka waxay muujisay in xawaaladaha Soomaaliya hoos u dhaceen 6.5% sannadkii 2023, balse warbixinta dhaqaalaha qaranka waxay muujisay koror xawaaladaha shaqsiyeed sannadkii 2024. Sidaas darteed, hoos u dhaca laga dareemayo qoysaska qaarkood ma aha caddeyn muujinaysa in dhammaan xawaaladaha dalka ay hoos u dhaceen.

4. Dagaalkii buuraha Calmiskaad iyo culayskii dhaqaale ee ka dhashay.

Dagaalka ka dhacay buuraha Calmiskaad ayaa isna noqday arrin kale oo saameyn ku yeelatay dhaqaalaha iyo nolosha bulshada Puntland. Colaadaha noocan ahi waxay sababi karaan barakac, hakad ku yimaada dhaqdhaqaaqa ganacsiga, kharashaad amni oo kordha iyo hoos u dhac ku yimaada kalsoonida maalgashiga. Waxaa intaas dheer, dagaalladu waxay saameeyaan qoysaska ay xubnahoodu ku lug leeyihiin colaadda, ganacsatada, shaqaalaha iyo dadka ku nool deegaannada ay dhibaatadu saamayso. Garoowe oo ah xarun maamul iyo dhaqaale ayaa dareemi karta culayska dhaqaale ee ka dhasha kharashaadka amniga ee kordha, baahiyaha bani'aadannimo iyo hubanti la'aanta ka dhalata colaadaha.

ICRC waxay Janaayo 2026 sheegtay in colaadda Calmiskaad ee lagula jiro xagjirka D*cish oo muddo ka badan sannad socotay ay qoysas badan ka barakicisay guryahoodii, kana lumisay dhulkii iyo ilihii nololeed ee ay ku tiirsanaayeen.

5. Shaqo la'aanta iyo hoos u dhaca awoodda wax-iibsiga

Marka la isku daro hoos u dhaca shaqooyinkii hay'adaha, mushahar la'aanta shaqaalaha dowladda iyo yaraanshaha fursadaha dhaqaale, waxaa si dabiici ah u kordhaya cadaadiska shaqo la'aanta. Dhalinyaro badan oo waxbaratay ayaa wajahaya caqabadda helitaanka shaqo ku habboon aqoontooda. Qaar ayaa ku qasbanaada inay galaan shaqooyin aan la jaanqaadayn xirfaddooda, qaar kale ayaa tahriiba, halka qaar kalena ay sugaan fursado aan si fudud ku imanayn. Natiijadu waa in awoodda wax-iibsiga ee qoysasku hoos u dhacdo, ganacsiyaduna ay la kulmaan iib yari. Marka lacagtii magaalada ku wareegi jirtay yaraato, ganacsiga yaryar iyo adeegyada maalinlaha ahi waxay noqdaan kuwa ugu horreeya ee dareema dhibaatada.

6. Kharashaadka nolosha iyo culayska qoysaska

Dhibaatooyinka dhaqaale ee kor ku xusan waxay ku soo ururayaan qoyska caadiga ah. Kirada guryaha, cuntada, biyaha, korontada, waxbarashada iyo caafimaadku waa kharashaad aan qoysasku si fudud uga maarmi karin. Qoyska dakhligiisu yaraaday ama waayay ilihii uu ku tiirsanaa wuxuu wajahaa kala-doorasho adag: inuu bixiyo kirada guriga, kharashaadka waxbarashada carruurta ama baahiyaha aasaasiga ah ee qoyska. Tani waxay muujinaysaa in dhibaatada Garoowe aysan ahayn oo keliya ganacsi gaabis ah, balse ay tahay arrin si toos ah u taabanaysa tayada nolosha, rajada dhalinyarada iyo mustaqbalka qoysaska.

Haddaba maxaa xal u noqon kara xaaladdan aan ka sheekaynay?

Xaaladda dhaqan-dhaqaale ee Garoowe waxay u baahan tahay in si qoto dheer loo fahmo, lagana gudbo in dhibaatada loo arko mid ku kooban shaqsiyaad ama ganacsato gaar ah. Waxaa loo baahan yahay qorshe dhaqaale oo wax ka qabta sababaha asaasiga ah.

Waxyaabaha mudnaanta leh waxaa ka mid ah:

B. Xoojinta dhaqaalaha gudaha iyo in la jebiyo qiimaha Korontada iyo Biyaha: In la-jebiyo qiimaha korontada iyo Biyaha lagana yeelo kuwo la awoodu karo, si' dhiirrigelin ay ugu noqoto ganacsiga, wax-soo-saarka gudaha iyo maalgashiga gaarka loo leeyahay.

T. Xaqiijinta mushaharka shaqaalaha dowladda: In la helo nidaam joogto ah oo lagu bixiyo mushaharka shaqaalaha.

J. Soo jiidashada hay'adaha iyo maalgashiga: In la abuuro jawi soo jiidan kara hay'adaha caalamiga ah iyo maalgashadayaasha.

X. Abuurista fursadaha shaqo: In dhalinyarada la siiyo fursado shaqo iyo xirfad-abuur.

Kh. Taageerada ganacsiyada yaryar: In ganacsatada yaryar la siiyo fursado maalgelin iyo dhiirrigelin dhaqaale.

Gabagabo Iyo Gunaanad:

Garoowe waxay u baahan tahay dib-u-soo-kabasho dhaqan-dhaqaale.

Garoowe maanta waxay wajahaysaa caqabado isbiirsaday oo aan hal dhinac oo keliya laga eegi karin. Hoos u dhaca shaqooyinkii hay'adaha caalamiga ah, mushahar la'aanta shaqaalaha dowladda, yaraanshaha taageerada dhaqaale ee qoysaska qaarkood ka heli jireen qurba-joogta, saamayntii dagaalkii Laascaanood iyo colaadda Calmiskaad ayaa dhammaantood qayb ka ah duruufaha dhaqaale ee bulshada saameeyay. Waxaa muhiim ah in la fahmo in magaalada aysan ku noolayn oo keliya ganacsatada waaweyn, balse ay ku tiirsan tahay dhaqdhaqaaq dhaqaale oo ay wadaagaan shaqaalaha dowladda, shaqaalaha hay'adaha, macallimiinta, ardayda, ganacsatada yaryar, darawallada, dadka guryaha kireeya iyo qoysaska kale ee dakhligoodu xaddidan yahay. Marka ilihii dhaqaalaha ee kooxahan yaraadaan, waxaa hoos u dhacaya dhaqaalaha magaalada oo dhan. Garoowe uma baahna oo keliya mashaariic

cusub iyo dhismayaal cusub; waxay u baahan tahay dhaqaale shaqaynaya, shaqo abuur, mushahar joogto ah, maalgashi iyo fursado ay dadkeedu nolol sharaf leh ku dhistaan. Horumarka magaalada laguma cabbiro oo keliya inta dhisme ee cusub ee laga hirgeliyo, balse waxaa lagu cabbiraa awoodda qofka caadiga ahi u leeyahay inuu helo shaqo, daboolo baahiyaha qoyskiisa, carruurtiisa waxbaro, mustaqbalkana rajo ka yeesho.

Tixraacyada iyo ilaha xogeed, xagga hoose 👇 ayaan soo dhigay ee ka eeg.

Somali Dispatch – Aid workers face uncertain future as funds dry up (2025)](https://www.somalidispatch.com/latest-news/aid-workers-face-uncertain-future-as-funds-dry-

Garowe Online – Puntland civil servants face financial hardship (2023)](https://garoweonline.com/index.php/en/news/puntland/somalia-puntland-civil-servants-face-financial-hardship-as-outgoing-president-diverts-salaries?

ICRC – One year on, families reeling from conflict in Puntland (2026)](https://www.icrc.org/en/news-release/somalia-one-year-families-reeling-conflict-puntland?

World Bank – Somalia Economic Update](https://documents1.worldbank.org/curated/en/099062024122018065/pdf/P179702-b6d33afa-4c46-464b-a51a-bd13e7847a36.pdf?

World Bank – Somalia's Growth Continues, But Shocks and Aid Cuts Intensify Risks (2026)](https://www.worldbank.org/en/news/press-release/2026/05/13/somalia-growth-continues-but-shocks-and-aid-cuts-intensify-risks-to-jobs-and-livelihoods?